

Xisaabta fasalka 9 aad: hage loogu talagalay waalidiinta

Wax ka ogoow koorxada xisaabta Fasalka 9 aad ee cusub iyo sida aad gacan uga geysan karto waxbarashada cunugaaga.

Hagahaan waxaa ku jira

- U wareegista hal koorso oo xisaab ah
- Isbeddellada muhiimka ah
- Maxay Ardaydu Baran Doonaan
- Taageer waxbarashada cunugaaga
- Sida aynu u kobcinay koorxada cusub
- Khayraadka



U wareegista hal koorso oo xisaab ah

Laga bilaabo bisha Simteembar 2021, ayaa waxaa jiri doonna hal koorso cusub oo xisaabta Fasalka 9aad ah oo loogu talagalay ardayda oo dhan. Tani macnaheedu waa in aysan jiri doonnin koorsooyin dhabbaqaad ama tacliimeed oo loogu talagalay xisaabta Fasalka 9aad.

Koorxada cusub waxay ardayda oo dhan siin doontaa waayo-aragnimo waxbarasho oo isku mid ah. Tani waa qayb ka mid ah [istiraatiijiyadda xisaabta afarta sano ee Ontario](#) si loogu caawinayo ardayda:

- in ay darajooyin fiican ka keenaan xisaabta
- in ay xalliyaan mas'alooyinka xisaabta ee maalin kasta
- in ay u diyaar-garoobaan shaqooyinka mustaqbalka

Faa'iidooyinka ardayda oo dhan

Waxaa jira caddeymo xoogan oo taageeraya in ardayda Fasalka 8aad aysan kala dooran koorsooyinka dhabbaqaadda ah iyo kuwa tacliimeed marka ay galaan Fasalka 9aad. Tani waxaa lagu magacaabaa de-streaming (in ardayda aanan loo kala-saari doonnin koorsooyinka dhabbaqaadda iyo kuwa tacliinta).

Qaar ka mid ah faa'iidooyinka muhiimka ah waxaa kamid ah:

- dejinta jaangooyinka tacliimeed oo sarreeya oo loogu talagalay ardayda oo dhan
- suurtagelinta ardayda xirfadaha iyo danaha kala duwan leh in ay wax wada bartaan
- kordhinta fursadaha iyo gacan ka geysashada sidii meesha looga saari lahaa caqabadaha nidaamiga ah ee hortaagan ardayda Asaliga ah, ardayga Madowga iyo ardayda kale ee la midab sooco, ardayda qoysaska dakhligoodu-hooseeya, iyo ardayda naafada ah iyo kuwo leh baahiyada waxbarasho ee gaarka ah
- in laga dhigo ikhtiyaarada mustaqbalka kuwo u furan ardayda oo dhan (tusaale ahaan, aadista kuleej, jaamacad ama gacanyarenimo ku shaqeyn)

Isbeddellada muhiimka ah

Manhajka xisaabta Fasalka 9 aad ayaa markii ugu dambaysay waxaa wax laba beddelay sannadkii 2005. Shaxda hoose ayaa muujinaysa isbeddellada ugu waaweyn ee lagu sameeyay koorsada.

Tusmada iyo qaab-dhismeedka

2005	2021
<ul style="list-style-type: none">Ardayda ayaa loo kala-saarey koorsooyinka tacliinta iyo kuwa dabbaqaadda.Ardayda ayaa waxaa ku adkaatay in ay isku-xiraan waxa ay ku barten Fasalka 8aad illaa Fasalka 9aad.Waxaa jiray farqi u dhaxeeyay koorsooyinka luuqadda-Ingiriiska iyo kuwa luuqadda-Faransiiska.	<ul style="list-style-type: none">Waxaa jiri doonna koorso hal bil soconaysa oo loogu talagalay dhammaan ardayda xisaabta Fasalka 9aad.Waxaa jiri doonna isku-xirnaan cad laga bilaabo Fasalka 8 aad illaa Fasalka 9 aad oo loogu talagalay ardayda.Koorsooyinka luuqadda-Ingiriiska iyo luuqadda-Faransiiska ayaa isku mid noqon doonna iyadoo la ixtiraamaayo kala duwanaanshaha dhaqanka iyo luuqadda.

Ka shaqeynta tirooyinka

2005	2021
<ul style="list-style-type: none">Ardayda waxaa laga filayay in ay faham adag ka yeeshaan tirooyinka ayna diyaar u noqdaan in ay fahamkaan ku dabbaqaan fikrado cusub.	<ul style="list-style-type: none">Ardaydu waxaa ay sii kobcin doonnaan fahamkooda ku saabsan tirooyinka maadaama ay baranayaan xisaabta intiijaas, jajabka, tirooyinka tobanlaha, boqolleyda, saamiyada iyo nisbooyinka iyo sida loogu dabbaqo xaaladaha noloshadhabta ah.

Isku-xirnaanta noloshadhabta ah

2005	2021
<ul style="list-style-type: none">Waxaa jira tusaalooyin laga bixinayo noloshadhabta ah oo loogu talagalay ardayda oo laga yaabo in laga soo tagay oo aan ku habboonayn caalamka maanta.	<ul style="list-style-type: none">Ardayda ayaa isku-xiraya waxa ay fasalka ku bartaan iyo xaaladaha noloshadhabta ah.Waxay kobcin doonnaan fahamkooda ku saabsan muhiimadda ay xisaabtu u leedahay guud ahaan dhaqammada kala duwan.

Aljabrada

2005	2021
<ul style="list-style-type: none">Barashadu waxaa diiradda lagu saarayaa xiriirrada toosan, sida garaafka leh xariiqada toosan.	<ul style="list-style-type: none">Ardayda waxay sii baran doonnaan xiriirrada toosan. Waxay sidoo kale baran doonnaan xiriirrada aan toosnayn si ardayda looga caawiyo u sii diyaar-garowga koorsooyinka xisaabta ee mustaqbalka. Tusaale ahaan, lafogurista garaafka xoodan iyo go'aaminta heerka ama nisbada qiimadhaca.

Dhisidda kalsoonida lagu qabo xirfadaha xisaabta

2005	2021
<ul style="list-style-type: none"> Qalabyada iyo istiraatiijiyadaha lagu dhisaayo kalsoonida lagu qabo xirfadaha xisaabta ayaa ahaa kuwo kooban. 	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda waxaa ay wax ka baran doonnaan qalabyada iyo istiraatiijiyadaha ka caawin doonna aqoonsashada dareenkooda iyo aqoonsashada kheyraadyada ka caawinaya dhisidda xiriir caafimaad qab leh oo lala yeesho xisaabta.

Afgarashada (Coding)

2005	2021
<ul style="list-style-type: none"> Ma jirin barashada xirfadaha afgarashada oo khasab ah. 	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda ayaa sii wadi doonna in ay dhisidda xirfadahooda afgarashada ka soo bilaabaan xisaabta dugsiga hoose, oo ay ku jiraan barashada abuurista, akhrinta iyo wax-ka-beddelka afgarashada. Waxay baran doonnaan in ay u adeegsadaan afgarashada (coding) oo ah qalab lagu fahmaayo fikradaha xisaabta ee balaaran, taasi oo gacan ka siinaysa sii wanaajinta awoodda ay ku xallinayaan mas'aladaha.

Barashada xogta

2005	2021
<ul style="list-style-type: none"> Barashadu waxaa diiradda lagu saarayay ururinta iyo maareynta xogta. 	<ul style="list-style-type: none"> Barashadu waxay ku dhisnaan doontaa manhajka xisaabta dugsiga hoose maadaama ay ardaydu kobcinayaan fahamkooda xogta, oo ay ku jiraan sida hay'adaha kala duwan u uruuriyaan, u adeegsadaan oo ay u keydiyaan xogta.

Jawmatiriga iyo Cabiraadda

2005	2021
<ul style="list-style-type: none"> Ardaydu waxay xalliyeen mas'alooyin ku lug leh cabbirka iyadoo la adeegsanayo halbeegyada cabbirka ee mitirka la xiriira. 	<ul style="list-style-type: none"> Ardaydu waxay xallin doonnaan mas'alooyinka cabbirka iyadoo adeegsanaya halbeegyada mitirka la xiriira iyo kuwa aan mitirka la xiriirin, oo inta badan loo adeegsado mihnadda ganacsiga.

Akhrinta dhaqaalaha

2005	2021
<ul style="list-style-type: none"> Ma jiraan filashooyin gaar ah oo ku saabsan barashada akhris-qoraalka maaliyadaha. 	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda waxaa ay baran doonnaan akhris-qoraalka maaliyadaha waxayna aqoontooda ku dabbaqi doonnaan waayo-aragnimada nololsha-dhabta ah. Tusaale ahaan, fahamka qiimo-kororka iyo qiimodhaca hantida, sida baabuurta, ama barashada sida wax looga badelo miisaaniyadda iyadoo lagu saleynaayo isbadelada xaaladaha.

Maxay Ardaydu Baran Doonaan

Koorsada xisaabta Fasalka 9aad ee cusub ayaa waxay ku dhisan tahay [manhajka xisaabta \(Fasallada 1 aad illaa 8 aad\) ee dugsiga hoose ee 2020](#).

Koorsadaan, ardayda waxaa ay ku baran doonaan xirfadaha iyo fikradaha xisaabta si loogu diyaariyo mustaqbalkooda. Hoos waxaa ku qoran meelaha diiradda la saarayo:

Xirfadaha barashada dareen-bulsho ee xisaabta

Ardaydu waxay:

- dhisi doonnaan xirfadahooda barashada dareen-bulsho, sida barashada in la aqoonsado oo la muujiyo dareennada taageerada barashada xisaabta
- dhisi doonnaan kalsoonidooda waxayna xiriir caafimaadqab leh la yeellan doonnaan xisaabta

Fikirka xisaabta iyo sameynta isku-xirrada

Ardaydu waxay:

- adeegsan doonnaan xirfadahooda dhibaato-xallinta, war-isgaarsiinta iyo sababeynta inta ay sii kobcinayaan aqoontooda xisaabta
- sameyn doonnaan isku-xirrada u dhexeeya waxa ay xisaabta ku bartaan iyo waayo-aragnimooda nolosha-dhabta ah

Tirooyin

Ardaydu waxay:

- ka shaqeyn doonnaan noocyada kala duwan ee tirooyinka, sida jibbaarka togan iyo jibbaarka taban
- xallin doonnaan mas'alooyinka la xiriira jjabka togan iyo jjabka taban, tirooyinka tobanlaha ah iyo abyoonayaasha
- dhisi doonnaan aqoontooda iyo xirfadahooda la xiriira boqolleyda, saamiyada, nisbooyinka iyo saamigalka waxayna sameyn doonnaan isku-xirrada xaaladaha nolosha-dhabta ah (tusaale ahaan, isbarbardhiga kharashaadka)

Aljabrada

Ardaydu waxay:

- kobcin doonnaan fahamkooda tibaaxaha iyo ikuweeshanka aljebraad
- dabbaqi doonnaan xirfadaha afgarashada si ay u fahmaan fikradaha xisaabta murakabka ah iyo si ay u sameeyaan saadaalin
- baran doonnaan xiriirrada toosan iyo kuwa aan toosnayn
- kordhin doonnaan fahamkooda nisbooyinka isbeddelka wayna dabbaqi doonnaan si ay macno ugu yeeshaan xaaladaha nolosha-dhabta ah (tusaale ahaan, falanqeynta dhaqdhaqaaqa baabuurta ama heerarka wasakhaynta)

Xogta

Ardaydu waxay:

- dhisi doonnaan xirfadahooda barashada akhris-qoraalka xogta si ay u baaraan uruurinta, metalaadda iyo isticmaalka xogta, oo ay ka mid tahay sida xogta loogu isticmaalo qaadashada go'aamada xog-ogaal loo yahay
- sii wadi doonnaan dabbaqaadda qaababka xisaabta si loo falanqeeyo xaaladaha nolosha-dhabta ah, sida saameynta ay baraha bulshadu ku yeellan karaan dhaqaalaha

Jawmatiriga iyo Cabiraadda

Ardaydu waxay:

- sameyn doonnaan isku-xirrada u dhexeeya qaababka joometeriga iyo sida loogu adeegsado cilmiga qaabaynta iyo dhisidda nakh-shadaha, injineernimada iyo nakh-shadeynta
- falanqeyn doonnaan oo ay abuuri doonaan nakh-shado si ay u kordhiyaan fahamkooda ku saabsan xiriirrada joometeri
- xallin doonnaan dhibaatooyinka nolosha-dhabta ah ee la xiriira dabbaqaadda aqoontooda meeriska, bedka, dul bedkiisa iyo mugga, sida qorsheynta iyo abuurista qaababka beeraha bulshada

Akhrinta dhaqaalaha

Ardaydu waxay:

- dhisi doonnaan aqoontooda maaliyadeed iyaga oo baranaya maareynta maaliyadaha, sida ka shaqeynta miisaaniyadaha iyo fahamka qiimo-kororka iyo qiimo-dhaca hantida

- falanqeyn doonnaan xaaladaha maaliyadeed ee kala duwan waxayna baran doonnaan sida xisaabta loo dabbaqi karo si loo gaaro go'aamo xog-ogaal loo yahay (tusaale ahaan, fahamka isbeddellada sayladda saamiyada)
- baari doonnaan sida qiimayaasha dulsaarka, lacag-bixinnada debaajiga ah iyo arrimaha kale ee saameyn kara go'aamada wax iibsiga

Taageer waxbarashada cunugaaga

Waxaad taageeri kartaa carruurtaada adiga oo ka caawinaya fahamka sida xisaabta ay door uga qaadato hawlaha maalin kasta iyo mustaqbalkooda. Tusaale ahaan:

- muuji in aad xiiseynayso waxa cunugaagu uu ku baranayo fasalka
- raadi siyaabo xisaabta loogu dari karo hawlaha maalin kasta ee ka socda guriga (tusaale ahaan, sameynta yoolal dhaqaaleyn, xisaabinta qiimo-dhimista iyo lacag-bixinnada dulsaarka, ama saadaalinta waqtiga safarka)
- carruurtaada kala hadal waxyaabaha ay ku xoogan yihiin, waxyaabaha ay xiiseynayaan, waxbarashadooda iyo yoolalkooda shaqo
- ka caawi carruurtaada in ay sameeyaan isku-xirrada u dhaxeeya waxa ay iskuulka ku bartaan, waxyaabaha ay xiiseeyaan iyo koorsooyinka ay doortaan in ay qaataan

- carruurtaada kala hadal fursadaha shaqo ee ku tiirsan xirfadaha xisaabta
- weyddii macallinka cunugaaga, tal-taliyaha hagista ama shaqaalaha kale ee iskuulka su'aalo ku saabsan xirfadaha iyo waayo-aragnimada loo baahan yahay si aad cunugaaga u caawiso sidoo kalena weyddii taageerada la heli karo
- xog-ogaal u noqo waxbarashada carruurtaada oo la xiriir iskuulkooda iyo macallimiintooda

[Wax badan ka ogoow sida aad cunugaaga ugu diyaarin karto xisaabta Fasalka 9 aad.](#)

Sida aynu u kobcinay koorsada cusub

Si loo horumariyo koorsada xisaabta Fasalka 9 aad ee cusub, ayaa gobolka Ontario wuxuu dib-u-eegis ku sameeyay cilmi-baaris hadda ah iyo hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee maamulada horseedka ah.

Koorsada ayaa sidoo kale lagu saleeyay jawaabcelin laga helay daneeyayaasha waxbarashada iyo la-hawlgalayaashooda, oo ay ku jiraan macaahida dugsigas sare ka-dib iyo la-hawlgalayaasha ka shaqeyha hawlaha waxbarashada.

Khayraadka

[Manhajka xisaabta Fasalka 1 -8 \(2020\)](#)

[Manhajka xisaabta Fasalka 10 aad \(2005\) iyo](#)

[Manhajka xisaabta Fasalka 11-12 \(2007\)](#)

[Mathify](#)